

SOMALI

# Ku soo dhowoow Finland



Ministry of Economic Affairs  
and Employment of Finland

# U soo guuritaanka Finland? Halkee ayaan ka bilaabayaa?

Marka aad Finland u soo guurto, waxaad wax ka qabataa arrimahan soo socda





## Guri

Waxaad raadsataa guri. Haddii aadan lahayn cinwaan, isuma diiwaan gelin kartid in aad tahay qof deggan dalkaan Finland. Guryaha kirada iyo kuwa uu qofka deggan iska leeyahay (omistusasunto), waxaad ka raddin kartaa internetka iyo wargaysyada. Guriga waxaad ka kireysan doontaa tusaale ahaan shakhsi baraayfad ama degmada. Marka aad guri hesho, waa inaad sidoo kale qaadataa oo gurgaa gelisaa caymiska guriga.



## Taariikhda dhalashada iyo lambarka diiwaanka, degmada iyo kaarka aqoonsiga

Taariikhda dhalashada iyo lambarka diiwaanka. Waxaa lagu siinayaa lambarka diiwaanka marka macluumaadkaaga laga diiwaangeliyo nidaamka xarunta xafiiska diiwaangelinta dadweynaha. Waxaad heli kartaa lambarka aqoonsiga, haddii aad Finland ku joogto qaab sharci ah, islamarkaana diiwaangelintaadu ay tahay mid sal leh. Lambarka aqoonsiga waxaa bixisa xarunta xafiiska diiwaangelinta dadweynaha (DVV), xafiiska canshuuraha si canshuur bixinta loo sameeyo awgeed, ama Waaxda socdaalka marka ay gaarayso sharciga degganaanshaha dalka ama diiwaangelinta xuquuqda degganaanshaha dalka awgeed. Xarunta xafiiska diiwaangelinta dadweynaha (DVV) waxaa ay caddeynaysaa, in la awoodo in adiga lagaa diiwaangeliyo **degmada** iyo inkale. Marka aad hesho degaan aad ku noolaato, waxaad isticmaali kartaa adeegyada degmadaada. Waxaad goobta adeegga dano dhamaysiga booliska ka codsataa **kaarka aqoonsiga (henkilökortti)**. Kaarka aqoonsiga waa dukuminti sawir leh oo caddaynaaya shakhsiyadda qofka, kaasoo la siin karo qofka muwaadinka ah ee u dhashay dalkaan Finland iyo qofka ajnabiga ah ee deggan dalkaan Finland.



## Shaqada

Waxaad iska diiwaan gelisaa xafiska shaqada iyo meheradaha (työ- ja elinkeinotoimisto) ama adeegyada shaqosiinta ee degmadaada, si laguugu geliyo diiwaanka inaad tahay qof shaqo codsade ah, haddii aadan shaqayn. Xafiiska shaqada ayaa adiga kaa caawinaaya sidii lagu shaqo gelin lahaa. Sidoo kale waxaad adiga laftigaaga si firfircooni leh u raadisaa goob shaqo, tusaale ahaan dhanka internetka iyo wargaysyada. Waxaad sidoo kale si toos ah ula xiriri kartaa shaqo bixiyayaasha.



## Internetka iyo telefoonka

**Waxaad raadsataa telefoon kuu gaar ah.** Waxaad heleysaa lamabr telefoon oo dalkaan Finland ah, markii aad ka iibsato khadka telefoonka dalkaan Finland. Khadka kaarka biribaydhka waxaad ka soo iibsaa kartaa dukaanka R-kioski-ga. Internetka ama dukaamada shirkadaha telefoonada: Sidoo kale dalkaan Finland gudahiisaa waxaad arrimaha badan ee kala duwan ka dhamaysan kartaa dhanka internetka.





### **Akoonka bangiga**

Waxaad furataa **akoon bangi**. Dalkaan Finland waxaa mushaarka iyo waxyaabaha kale ee qofka la siinaayo lagu soo shubaa akoon bangi. Waxaad u baahan tahay baasaboortu iyo kaarka aqoonsiga, si laguugu furo akoonka bangiga.



### **Luqadda Finishka iyo iswidishka**

**Waxaad raadsataa kooraska luqadda finishka iyo iswidishka**, haddii aadan luqadda aqoon. Sidoo kale waxaad luqadda finishka iyo iswidishka ka baran kartaa internetka. Sidoo kale waxaad barashada luqadda finishka iyo iswidishka ka geli kartaa dhanka internetka, adigoo u maraaya dhanka xafiiska shaqada iyo macmiilnimada degmada.



### **Daryeelka arrimaha bulshada**

Waxaad la xiriirtaa Kela, haddii aad doonaysid inaad dalbato gunnada kela-da iyo kaarka kelada. Kela-da waxaa ay dadka ka taageertaa xaaladaha nololaha ee kala duwan. Waxaad heli kartaa gunnooyinka kela-da, haddii aad si joogto ah ugu nooshahay Finland ama aad ka shaqayso, shaqo uu kaa soo galaayo xadka dakhliga ee ugu yar. Kela ayaa caddeyneysa xuquuqdaada daryeelka arrimaha bulshada, marka aad wax gunno ah ka dalbanayso ama kaarka Kela-da. Kaarka kela-da waxaad ka dalban kartaa magdhowga daawada dhakhtarku soo qoro iyo kharashka daryeelka caafimaadka ee gaarka ah.



### **Kaarka canshuurta**

**Waxaad kaarka canshuurta ka raadsataa xafiiska canshuuraha.** Waxaad hore u sii qaadataa kaarka aqoonsiga, marka aad codsanayso kaarka canshuurta. Waxaad codsan kartaa kaarka canshuurta, marka aad taqaanid mushaarka kuu soo dhacaaya ama dakhligaaga kaleba. Waxad mustaqabalka ka dalban kartaa kaarka canshuurta dhanka internetka ama telefoonka.

## Ma u baahannahay sharciga degganaanshaha dalka?

### Muwaadiniinta waddamada waqooyiga yurub

Muwaadiniinta waddamada waqooyiga yurub waxaa ay xaq u leeyihiin xuquuqda degganaanshaha iyo shaqo qabashada dalkaan Finland. Waxaad si shakhsi ahaaneed ah u tagtaa xarunta xafiiska diiwaangelinta dadweynaha (DVV), haddii aad leedahay taariikhda dhalashada iyo lambarka aqoonsiga, ama aad doonayso in aad Finland ka hesho degaan aad ku noolaato.

### Muwaadiniinta Midowga Yurub, Liechtenstein iyo muwaadiniinta Switzerland

Uma baahnid sharciga degganaanshaha Finland, haddii aad tahay muwaadin u dhashay waddamada Midowga Yurub, Liechtenstein iyo dalka Switzerland. Haddii aad joogayso Finland inkabadan 3 bilood, waxaad joogitaankaaga ka diiwaangelisaa Waaxda socdaalka muddo 3 bilood gudahood ah laga soo bilaabo maalinka loo soo guuray dalkaan Finland.

### Xubnaha qoyska ee muwaadiniinta Midowga Yurub

Waxaad diiwaangelisaa xuquuqdaada sharciga degganaanshaha, haddii aad tahay xubin qoyska ka tirsan ee muwaadiniinta Midowga yurub, islamarkaana aad adiga laftigaagu tahay muwaadin ka tirsan Midowga Yurub. Waxaad codsataa kaarka sharciga degganaanshaha dalka ee xubinka qoyska ee muwaadinka Midowga Yurub, haddii aad tahay xubinka qoyska ee muwaadinka Midowga yurub, laakiin aadan adiga laftigaagu ahayn muwaadiniinta Midowga Yurub.

### Dadka kale ee aan ahayn muwaadiniinta Midowga Yurub, Liechtenstein, Switzerland ama muwaadiniinta waddamada waqooyiga Yurub

Waxaad u baahan tahay sharciga degganaanshaha dalka, haddii aad doonayso inaad Finland timaaddo wax kabadan 3 bilood. Ka codso sharciga degganaanshaha dalka safaaradda Finland ee ku taalla dalka aad ka imaanayso ama Waaxda socdaalka ee Finland. Codso sharciga degganaanshaha ugu horreeya kahor intaadan imaan Finland. Waxaad shrcigga ka codsan kartaa dhanka internetka ee adeegga Enter Finland.

### Dadkii qurbaha ka soo laabtay

Haddii aad tahay dadka qurbaha ka soo laabtay waxaad heli kartaa sharciga degganaanshaha dalka, haddii aad tahay qof fir ama asal ku leh Finland ama xiriir sokeeye ee Finland.

### Faahfaahinta dheeraadka ah

**Waaxda socdaalka Finland iyo dano ka dhamaysiga dhanka internetka**  
[www.migri.fi](http://www.migri.fi)  
[www.enterfinland.fi](http://www.enterfinland.fi)

**Xarunta xafiiska diwaangelinta dadka (Digi-ja väestötietovirasto)**  
[www.dvv.fi](http://www.dvv.fi)

Waxaad ka heleysaa bogga internetka ee DVV macluumaadka ku saabsan, qaabka aad u keydinayso nidaamka macluumaadka dadweynaha, cinwaankaaga iyo macluumaadkaaga shakhsiyadeed.

## Xaggee ayaan ka helayaa taageerada dal la qabsiga, shaqaalaysiinta iyo barashada luqadda?

Waxaad heleysaa adeegyo kala duwan, kuwaasoo kugu caawinaaya la qabsiga dalka, shaqaalaysiinta iyo barashada luqadda finishka iyo iswidishka. La qabsiga dalku waxaa uu u baahan yahay firfircoonidaada gaarka ah iyo qaabka ay bulshadu kuu soo dhoweyso.

Xafiiska shaqada iyo meheradaha (TE-toimisto) ama degmada ayaa caddeynaaya ka baaraandegista ugu horreysa, tusaale ahaan waxbarashadaada, khibradada shaqo iyo xirfaddaada luqadeed. Haddii aad u baahan tahay caawimaad la qabsiga dalka, xafiiska shaqada ama degmada ayaa adiga kaa caawinaaya qorshaha la qabsiga dalka. Waa shaqada ugu dambayn 3 sano gudahood, laga soo bilaabo markii aad heshay sharcigii degganaanshaha ee ugu horreeya ama xuquuqdaada degganaanshaha la diiwaangeliyay.

Xafiiska shaqada ama degmada ayaa kugu hagaaya adiga markii loo baahdo waxbarashada laqabsiga dalka. Waxbarashada waxaa ka mid ah barashada luqadda, bulshada, dhaqanka iyo soo indha-indhaynta nolasha shaqada. Waxaa intaas dheer in waxbarashada ay ka qayb tahay waxabarashooyin kale iyo tababarka shaqada.

Xafiiska shaqada, Kela ama degmada ayaa caddeynaaya xuquuqdaada ah inaad hesho gunnada shaqo la'aanta ama taageerada kaalmada nolasha, mudada lagu guda jiro qorshaha la qabsiga dalka.

### Faahfaahinta dheeraadka ah:

**Adeegyada xafiiska shaqada iyo meheradda (Työ- ja elinkeinopalvelut)**  
[www.te-palvelut.fi](http://www.te-palvelut.fi)

Waxaad ka hubisaa adeegyada la qabsiga dalka bogagga internetka ama goobaha adeegyada ee degmadaada.

**Barashada luqadda**  
[www.kotisuomessa.fi](http://www.kotisuomessa.fi)  
[www.finnishcourses.fi](http://www.finnishcourses.fi)

## Haddii aan xanuunsado?

Waxaad isticmaali kartaa adeegyada daryeelka caafimaadka ee guud, haddii aad degaan ku leedahay Finland. Haddii aadan degaan ku lahayn Finland, Kela-da ayaa caddeynaysa xuquuqdaada ah daryeelka caafimaadka ee guud, ee ku salaysan shaqada. Waxaa intaas dheer in goobo ka mid ah kuwa shaqada ay leeyihiin daryeelka caafimaadka.

Haddii aad Finland ugu nooshahay si joogto ah, waxaad sida guud uga tirsan tahay caymiska caafimaadka, waxaadna heli kartaa magdhowga daryeelka caafimaadka gaarka ah iyo kharashyada daawada. Magdhowga waxaa sidoo kale aad ka heli kartaa daryeelka lagugu siiyay waddanka dibaddiisa. Waxaad Kela-da ka codsan kartaa kaarka caymiska caafimaadka ee yurub.

Dhibaatooyinka caafimaadka maskaxda waxaad caawimaaddeeda ka heleysaa xaruntaada caafimaadka ee xaafadda.

Haddii aad u baahan tahay xaalad degdeg ah, waxaad la xiriiri kartaa gargaarka degdegga ah ee xaruntaada caafimaadka ama isbitaalka.

### Faahfaahinta dheeraadka ah:

**Kela**  
[www.kela.fi](http://www.kela.fi)

**Mieli ry**  
[www.mieli.fi](http://www.mieli.fi)

## Xaaladaha degdegga ah

Lambarka emerjensiga ah ee Finland waa 112. Waxaad lambarkaas wacdaa marka ay jirto xaalad degdeg ah oo kaliya, sida khatar xagga nafta ah, caafimaadka, hantida ama degaanka. Haddii loo baahdana, waxaa xarunta emerjensiga kaa caawinaaya qof turjubaan ah.

# Faahfaahin dheeraad ah

**Ku soo dhowoow Finland**  
[www.tem.fi/tervetuloa-suomeen](http://www.tem.fi/tervetuloa-suomeen)

**InfoFinland**  
[www.infofinland.fi](http://www.infofinland.fi)

**Degaanka (Asuminen)**  
[www.asuminen.fi](http://www.asuminen.fi)

**Digi- ja väestötietovirasto**  
[www.dvv.fi](http://www.dvv.fi)

**Waaxda socdaalka (Maahanmuuttovirasto)**  
[www.migri.fi](http://www.migri.fi)

**Kela**  
[www.kela.fi](http://www.kela.fi)

**Maamulka canshuuraha (Verohallinto)**  
[www.vero.fi](http://www.vero.fi)

**Adeegyada shaqada iyo meheradaha (Työ- ja elinkeinopalvelut)**  
[www.te-palvelut.fi](http://www.te-palvelut.fi)

**Barashada luqadda (Kielen opiskelu)**  
[www.kotisuomessa.fi](http://www.kotisuomessa.fi)  
[www.finnishcourses.fi](http://www.finnishcourses.fi)

**Wasaaradda arrimaha dibadda (Ulkoministeriö)**  
[www.um.fi](http://www.um.fi)

**Waxbarashada Finland gudaheeda (Opiskelu Suomessa)**  
[www.studyinfinland.fi](http://www.studyinfinland.fi)

**Adeegyada guud ee dhanka internetka (Julkiset palvelut verkossa)**  
[www.suomi.fi](http://www.suomi.fi)

**Kansalaisneuvonta**  
[www.kansalaisneuvonta.fi](http://www.kansalaisneuvonta.fi)  
Puhelin 029 5000



Ministry of Economic Affairs  
and Employment of Finland

 **Kotoutuminen.fi**  
Integration.fi

  
**infoFinland.fi**

**Macluumaad aasaasi ah oo ku saabsan ku  
noolaanshaha iyo joogitaanka Finland**

Ku soo dhowoow Finland waa macluumaad isku xiran oo uu soo saaray xafiiska shaqada iyo meheradaha, kaasoo ay hirgelintiisa mas'uul ka tahay xarunta aqoonyahannada laqabsiga dalka ee wasaaradda iyo magaalada Helsinki infoFinland.fi-toimitus. (versio 1/2022).